**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA**
**SOLICITOR GENERAL OFFICE**

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند


| Sannadkii 11aad | Cadad Gaar ah | Tariikhda Daabacada 26/03/2022 |
|---|---|---|


# XEERKA KALA XADAYNTA MUSHAHAROOYINKA IYO GUNNOOYINKA MADAXWEYNAHA, MADAXWEYNE KU XIGEENKA IYO MUDANAYAASHA GOLAYAASHA XEERDEJINTA
# XEER LR.46/2010


**Email: garyaqaankaguud@gmail.com**
**Web.www.garyaqaankaguud.com**


*Sannadka 2022*

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XM/249-368/022011 DATE 13/02/11

# XEER MADAXWEYNE No: 0113/022011

## DHAQAN-GALKA XEER LR. 46/2010
## XEERKA KALA XADAYNTA MUSHAHAROOYINKA, GUNOOYINKA MADAXWEYNAHA IYO MADAXWEYNE KU-XIGEENKA IYO MUDANAYAASHA XEER DEJINTA

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu Arkay:** Ogolaanshaha Golaha Wasiirada ee Xeer Lr. 46/2010,

**Markuu Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland,

**Markuu Helay:** Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee ku suntan GW/Kf-QC10/508/2011 ee 10/02/2011 ee Xeerka Kala Xadaynta Mushaharooyinka, Gunooyinka Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka iyo Mudanayaasha Xeer Dejinta Xeer Lr. 46/2010,

**Markuu Arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Wuxuu Soo Saaray**

Dhaqan-galka Xeer Lr. 46/2010 ee Xeerka Kala Xadaynta Mushaharooyinka, Gunooyinka Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka iyo Mudanayaasha Xeer Dejinta.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

**The Republic of Somaliland**
**House of Representatives**
**Head Quarter Hargeisa.**

**Jamhuuriyadda Somaliland**
**Golaha Wakiilada**
**Xarunta Hargeysa.**

Ref: GW/KF-14/508/2011 Date : 05 /02 / 2011

**GO'AANKA ANSIXINTA XEERKA KALA XADAYNTA MUSHAHARADA**

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

**Markuu arkay:** Ahmiyada Balaadhan ee uu Xeerkani u Leeyahay dalka.

**Markuu ogaaday:** In aanu jirin xeer hore oo loo raacaa Mushahaarooyinka ay qaataan Masuulayiinta Qaranka ayna waajib distuuri ah tahay dejinta soo saarida xeerkani sida ku cad dastuurka qaranka qodobkiisa **47**$^{aad}$**,65**$^{aad}$ **& 87**$^{aad}$

**Markuu tixgeliyey:** Duruufaha Dhaqaale ee dalka, loona baahan yahay in la isku filaysiiyo dhaqaalaha kooban ee dalka.

**Markuu Aqoonsaday:** In Nuxurka xeerkani xambarsanyahy uu yahay Muuqaal cad iyo Xisaab cad.

**Markuu u Codeeyay:** xeerka kala xadaynta Mushaharooyinka Madaxwaynaha Madaxwayne ku xigeenka iyo Baarlamanka ,ka **kal-fadhigii 14**$^{aad}$ ee **caadiga ahaa** fadhigiisi **5aad** ee**05/02/2011** oo ay goob jog ahaayeen **47**mudane oo ka mida mudanayaasha Golaha Wakiilada

# WUXUU

Cod aqlabiyad ah **(45cod) shan iyo afartan** oo gacan taag ah ku ansixiyey halka **(1) hal Mudane** ka aamusay, **Gudoomiyuhuna** muu codayn sida caadada u ah.

**ALLAA MAHADLE**

**C/risaaq Siciid Ayaanle.**
**Xog.Guud ee G/Wakiilada JSL**

**C/Casiis Maxamed Samaale**
**K/S Gudoomiyaha Golaha Wakiilada**
**AhnaGudoomiye ku Xigeenka 1aad**

## XEERKA KALA XADAYNTA MUSHAHAROOYINKA, GUNOOYINKA MADAXWEYNAHA IYO MADAXWEYNE KU-XIGEENKA IYO MUDANAYAASHA GOLAYAASHA XEER DEJINTA

## (GUURTIDA IYO WAKIILADA)

**(Xeer No: 46/2010)**

**Golaha Wakiiladu:**

| | |
|---|---|
| Markuu arkay: - | Ahmiyada Balaadhan ee uu Xeerkani u leeyahay dalka. |
| Markuu Ogolaadey: - | In aanuu jirin xeer hore oo loo raacaa mushaharooyinka ay qaataan Masuuliyiinta Qaranka ayna waajib dastuuri ah tahay dejinta soo saarida xeerkani sida ku cad dastuurka qaranka qodobkiisa 47, 65 & 87 |
| Markuu tixgeliyay: | Duruufaha Dhaqaale ee dalka, loona baahan yahay in la isku filaysiiyo dhaqaalaha kooban ee dalka. |
| Markuu Aqoonsadey: | in nuxurka xeerkani xanbaarsanyahay uu yahay muuqaal cad iyo xisaab cad |
| Markuu Arkay: | Qod: 47, 65, 87, Dastuurka JSL, |

**WUXUU ANSIXIYEY XEERKAN XADAYNTA MUSHAHAROOYINKA IYO GUNOOYINKA MADAXWEYNAHA, MADAXWEYNE KU XIGEENKA IYO MUDANAYAASHA GOLAYAASHA XEER DEJINTA (GUURTIDA IYO WAKIILADA).**



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## XUBINTA KOWAAD

## TILMAANTA GUUD

### Qodobka 1aad:

### EREY BIXINTA.

1. **Madaxweyne**: waxa loola jeedaa masuulka ay ummadu u dooratay Madaxweynaha Qaranka, muddada uu xilka hayo.

2. **Madaxweyne ku xigeen**: waxa loola jeedaa: Masuulka ay ummadu u dooratay Madaxweyne ku xigeenka Qaranka, mudada uu xilka hayo.

3. **Gudoomiye**: waxa loola jeedaa labada Gudoomiye ee golayaasha Xeer dejinta (Guurtida iyo Wakiilada)

4. **Gudoomiye ku xigeeno**: waxa loola jeedaa afarta guddoomiye ku xigeen ee labada Gole.

5. **Mudane**: waxa loola jeeda xildhibaanada labada Gole ee Xeer dejinta umadu u dooratay ama u xulatay Golayaasha Xeer dejinta.

6. **Xubin Sharaf**: waxa loola jeedaa xubno sharafyada Golaha guurtida ku jira ee dastuurka qaranku cadeeyey ee aan codka lahayn.

7. **Mushahar**: waxaa loola jeedaa qadar lacag ah oo uu qofku ku qaato shaqo cayiman oo uu qabto mudo xadidan.

8. **Gunno**: waxaa loola jeedaa qadar lacag ah oo uu qofku ku mutaysto masuuliyad, hawl, duruuf ama baahi gaar ah ama guud taas oo ku xadidan mas'uuliyad ama xil, ama hawl ka dheeri ah mushaharka ama iskeed u taagan.

9. **Kharash Hawleed**: waxaa loola jeedaa kharashyada iyo xisaabaadka ay ku shaqeenayaan Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka iyo Golayaasha xeer dejintu ee ku cadaan doona miisaaniyad sanadeedka qaranka kana baxsan xeerkan

### Qodobka 2aad
### MAGACA XEERKA

Xeerkan waxaa lagu magcaabayaa xadaynta mushahaarooyinkaiyo gunnooyinka madaxwaynaha, madaxwayne ku xigeenka iyo mudanayaasha Golayaasha xeerdejinta (guurtida iyo wakiilada).

### QODOBKA 3aad
### UJEEDOOYINKA XEERKA.

**Xeerkan ujeedooyinkiisa waxa kamid ah oo ugu muhiimsan:**

1. In la dhameystiro xeerarka ka dheegmaya Dastuurka jamhuuriyadda Somaliland ee ay waajib tahay meel maristiisu gaar ahaan qodobada 47, 65, 87 ee dastuurka.

2. In la xoojiyo la xisaabtanka iyo mugdi ka saarka maamul dawladeedka hantida qaranka jamhuuriyada Somaliland (accountability and transparency) si loo gaadho maamul wanaag dawladnimo (good governance).

## XUBINTA LABAAD

## XADAYNTA MUSHAHAROOYINKA IYO GUNOOYINKA.

### Qodobka 4aad.

Madaxweynaha, ku-xigeenka madaxweynaha iyo mudanayaasha golayaasha xeer dejinta (guurtida iyo wakiilada) waxay xaq u leeyihiin mushaharooyin iyo gunooyin joogto ah oo billeh ah.

### Qodobka 5aad.

### MUSHAHARKA GUNOOYINKA MADAXWEYNAHA IYO KU XIGEENKIISA.

Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa waxa xeerkani u xadeynayaa mushaharooyinka iyo gonooyinka kala ah

1. A) Mushaharka Madaxweynaha bishii wuxuu noqonayaa bishiiba sl.sh. 45, 500, 000

+

1. b) Gunnada xilka ee Madaxweynuhu waxay noqonaysaa bishiiba sl.Sh. 22,750,000

**Isugayn guud sl.Sh. 68,250,000**

2. A) Musharka ku-xigeenka madaxweynuhu wuxuu noqonayaa bishiiba sl.Sh. 32,500,000

+

2. B) Gunnada xilka ku-xigeenka Madaxweynuhu waxay noqonaysaa bishiiba sl.Sh. 16,250,000

**Isugayn guud sl.Sh. 48,750,000**

### QODOBKA 6aad

### KHARASH HAWLEEDKA.

Hantida dawlada iyo kharashka maamul siyaasadeedka (political fund) ee ay ku shaqeeyaan kuna dhaqmayaan, hawlaha qarankana ku fuliyaan Madaxweynaha iyo madaxweyne ku xigeenkiisu ee ka baxsan mushaharka iyo gunooyinka lagu sheegay xeerkan waxa lagu cadeynayaa miisaaniyad sanadeedka qaranka Jamhuuriyada Somaliland.

### QODOBKA 7aad

### MUSHAHARKA IYO GUNOOYINKA GOLAYAASHA XEER DEJINTA.

Xadeynta mushaharooyinka iyo gunooyinka mudanayaasha golaasha xeer dejinta (guurtida iyo wakiilada) wuxuu noqonayaa sida tan:

1. A) Guddoomiyaha golaha guurtidu mushaharkiisu wuxuu noqonayaa bishiiba

sl. Sh. 6,500,000

1. B) Guddoomiyaha golaha guurtidu wuxuu yeelanayaa guno xil bishiiba sl. Sh. 3,250,000

1. c)Guddoomiyaha golaha guurtidu wuxuu yeelanayaa gunno guri bishiiba

Sl.Sh 3,250,000



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Isugayn guud** **sl.Sh. 13,000,000**

2. A) Guddoomiyaha golaha wakiiladu mushaharkiisu wuxuu noqonayaa bishiiba

sl. Sh. 6,500,000

2. B) Guddoomiyaha golaha wakiiladu wuxuu yeelanayaa guno xil bishiiba sl. Sh. 3,250,000

2. C) Guddoomiyaha golaha wakiiladu wuxuu yeelanayaa guno guri bishiiba sl. Sh. 3,250,000

**Isugayn guud** **sl.Sh. 13,000,000**

3. A) afarta gudoomiye ku xigeen ee golayaasha xeer dejinta (guurtida iyo wakiilada) mid kasta wuxuu yeelanayaa mushahar bishiiba

sl. Sh. 6, 500,000

3. B) Afarta gudoomiye ku xigeen ee kor ku xusan wuxuu yeelanayaa mid kastaaba guno xil bishiiba

sl. Sh. 1,950,000

3.C) midkastaa waxa uu yeelanayaa guno guri bishiiba sl. Sh. 1,950,000

**Isugayn mid kastaa wuxuu yeelanayaa bishiiba** **sl.Sh. 10,400,000**

## QODOBKA 8aad

## MUDANAYAASHA XEER DEJINTA

Mudanayaasha golayaasha xeer dejinta (guurtida iyo wakiilada) mudane kasta wuxuu yeelanayaa.

a. Mushahar dhan bishiiba sl. Sh. 6,500,000
b. Guno guri oo dhan bishiiba sl. Sh. 1,625,000

**Isugayn mudane kasta wuxuu yeelanayaa bishiiba** **sl. Sh. 8,125,000**

## QODOBKA 9aad

## XUBIN SHARAF

Xubno sharafeed yada golaha guurtida ku jira ee dastuurka qaranku cadeeyay waxa ay la xuquuq yihiin mushahar iyo gunno ba mudanayaasha xeer dejinta ee golaha guurtida.

## XUBINTA SADDEXAAD

## QODOBO GUUD

## QODOBKA 10aad

## DIB U-EEGISTA XEERKA.

Mushaharooyinka iyo gunnooyinka uu xeerkani dhigayo waxa uu golaha wakiiladu dib u-eegis ku samaynayaa mar kasta oo loo baahdo, iyada oo la waafajinayo hadba xadiga dhaqaalaha dadka iyo nolosha bulshada.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

QODOBKA 11aad

DHAQANGALKA XEERKA

Xeerkani wuxuu dhaqangalayaa marka golaha wakiiladu ansixiyo, madaxweynuhuna saxeexo

C/risaaq Siciid Ayaanle

Xog. Guud ee golaha wakiilada

C/casiis Maxamed Samaale

K/S Gudoomiyaha Golaha Wakiilada ahna
Gudoomiye K/xigeenka 1aad



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE